# Lacag Khalad u Siinta Shaqaalaha Shaqo La’aanta ah

Unemployment Overpayments

## Waa maxay Lacag khalad u siinta shaqaalaha Shaqo La’aanta ah?

Lacagta shaqaalaha shaqo la’aanta ah la siiyo (UI) waxaa la siiyaa dadka shaqo la’aanta noqda iyagoon khaladka dhuminta shaqadoodu aysan iyagu laheyn. Dadka intiisa badani waxay ugu yeeraan taa “Shaqo La’aan” (“Unemployment”). Lacagta shaqaalaha shaqo la’aanta ah khaladka lagu siiyo waxa ay dhacdaa kolka aad hesho lacag aanay ahayn inaad hesho. Waxaa jira 2 nooc oo lacagaha khaladka loo siiyo shaqaalaha shaqo la’aanta ah:

- Lacag Khalad u Siin Caadi ah
- Khalad Lacag u siin ku salaysan been abuurid(arrinta waxaa kaloo loogu yeeraa khalad musuqmaasuq ah lacag ku qaadasho)



## Waa maxay lacag khalad u siintu?

Sababaha inta badan ugu waaweyn lacag khalad ku qaadashadu waa:

- Waa in aadan soo sheegin dakhli, ama in aadan markiiba soo sheegin dakhli kolkii aad qaadanaysay lacagta shaqaalaha shaqo la’aanta ah la siiyo.
  - Waa khasab inaad soo sheegto dakhligaaga asbuuca aad kasbato, ee aadan soo sheegin asbuuca lacagta lagu siiyo.
  - Waa khasab inaad soo sheegto dakhliga guud (ka hor canshuurta) ee aadan soo sheegin lacagta jeebkaaga gasha ee aad guriga u qaadato.

- Waxaa laguu bilaabay lacagta Shaqaalaha shaqo la’aanta la siiyo, laakiin shaqadaadii ayaa racfaan ka qaadatay qaadashadaada lacagtaa, kolkaa xaakimkuna waa ku raacay inaadan xaq u lahayn lacagta. Kolkaa waa inaad soo celisaa lacagtii aad qaadatay.

Marmarka qaarkood, lacag khalad lagu qaataa waa ay dhacdaa sababtoo ah gobolka ayaa khalad sameeya kolka ay lacagaha soo dirayaan. Xataa haddii lacag khaladka u siintu aysan adiga khaladkaaga ahayn, waa inaad dib u celisaa wixii lacag ah ee dheeri ee khalad ah.

## Waa maxay faraqa u dhaxeeyaa lacag khalad u siinta caadiga ah iyo midda been abuurid ku salaysan?

**Lacag Khalad u Siinta Caadiga**

- waxa ay dhacdaa iyadoo sababtu tahay:
  - gobolka ayaa khalad sameeya
  - gobolka ayaa u maleeya inaad adigu khalad sameysay ama
  - racfaan ayaa bedela go’aan gobolku uu horey u gaartay

- waxa ay ku jirtaa diiwaankaaga 6 sanno ama inta laga bixinayo, hadba kii soo hor mara.
- ma laha wax dulsaar ama ganaaxyo ah
- Waa aad qaadan kartaa Lacagta Shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo haddii khalad u qaadasha lacagta ee caadiga ah lacag ah lagugu leeyahay, laakiin gobolka waxa uu qaataa mid 50% ama 100% lacagtaada si dib loogu bixiyo lacagtii khaladka lagu bixiyey.

**Lacag khalad ah oo dheeri oo been abuurid ku salaysan?**

- Waxa ay dhacdaa kolka gobolka uu aaminsan yahay inaad bixisay oraah been ah. Sidda haddii aadan soo sheegin kasbashada lacag adigoo og inay ahayd inaad soo sheegto.
- Waxa ay ku jirtaa diiwaankaaga 10 sanno ama inta laga bixinayo, hadba kii soo hor mara.
- Waxaa lagu daraa 40% ganaax ah iyo waliba dulsaar. Waxaa jira ganaaxyo kale oo uu gobolku isticmaali karto, laakiin inta badan marna ma uu isticmaalo gobolku arrintaa.
- Ma qaadan kartid lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo haddii lacag lagugu siiyey been sheegid. Lacag aad qaadan lahaydna lagu bixin maayo lacagtii khaladka aad ku qaadatay.

## Lacagta dheeriga ah ee la yiri waad qaadatay waa khalad. Maxaan sameyn karaa?



Ogaysiiskan si taxadar leh u akhri. Haddii uu kani yahay ogaysiiskii ugu horeeyey ee aad hesho ee ku saabsan lacagta la yiri khalad baad u qaadatay, waxa aad ka qaadan kartaa racfaan. **Waa khasab inaad racfaanka qaadato ka hor maalinta ugu dambaysa ee racfaanka la qaadan karo**. Ma jiraan cid laga reebayo xeerkan. Waxa aad racfaanka ku qaadan kartaa khadka (online) ka ama adiga oo warqad soo diraya. Waxa aad wici kartaa xafiiska deegaankaaga ee gargaarada dhanka sharciyada (legal aid) si laguu caawiyo, laakiin ha gafin waqtiga racfaankaaga inta aad sugayso caawimaad kiiskaaga ah.

Hel xafiiska deegaankaaga ee gargaarada sharciyada (legal aid) adigoo wacaya 1(877) 696-6529.

## Ma awoodo inaan dib u bixiyo lacagta. Hadda maxaan sameeyaa?

Waxa aad dooran kartaa inaad bixiso wixii aad awoodo ama inaad heshiis bixin lacagta ah aad sameysato. Kugulama talinayno inaad sameysato qorsheyaal dib u bixinta lacagta ah. Xataa haddii aad sameysato qorshe bixinta lacagta ah, arrimahan soo socdaa ayaa dhici doona.

**Gobolku waxa uu adeegsadaa dakhli qabsi si lacagta khaladka lagu qaatay dib loogu bixiyo.** Taa macnaheedu waa waxa ay qaadan lacagtaada canshuurta celinta kaaga soo noqonaysa, lacagta kiradda ku soo noqota, lacagta guryaha ku soo noqota iyo lacagaha khamaarka lagu guulayasto lagu helo. Kala hadal canshuur diyaariyahaaga inuu lacagta canshuurta gobolka kaaga soo noqonaysa uu ka dhigo inta ugu yar ee suurtagalka ah. Ka eeg warqadayada xogta aruursan ee *Marka Ay La Haraan Cashuurta Gobolka Kaaga Soo Noqon Laheyd,* wixii kale ee akhbaar ah ee ku saabsan dakhli qabsiga. Ka dib 6 sanno lacagta dheeriga ah ee caadiga ah iyo ka dib 10 sanno tan been sheegid ku helida lacagta dheeri ah, wixii aan lagu bixin dakhli dib u qabsiga kolkaa waa laga tirtir diiwaanka.

- **Haddii lacag dheeri ah oo khaladka caadiga ah lagu siiyey aadna xaq u yeelato lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo** ka dib kolka la ogaado cadadka lacagta dheeriga ah ee lagu siiyey, gobolku waxa uu qaadan 50% ama 100% lacagtaada. Waxa ay qaadan 100% haddii lacagta dheeriga ah lagu siiyey iyadoo sababtu tahay inaadan soo sheegin dakhli, waxay u qaadan 50% sababo kale. Xaq uma aad lehid lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo haddii lacag dheeri ah aad musuqmaasuq ku heshay.

Iyadoo ka duwan noocyada kale ee lacagaha dheeriga ah ee khaladka loo qaato, gobolku ma saamaxo, mana joojiyo qaadida lacagta dheeriga ah ee shaqo shaqo la'aanta ah khaladka lagu siiyo iyadoo sababtu ay tahay inaad qaadato barnaamijyo kale sidda MA ama MFIP.

## Maxaa dhici hadii aanan waxba sameyn aana u daayo in gobolku uu u qaato lacagta khaladka la ii siiyey dakhli qabsi?

Gobolku uma sheego lacagta dheeriga ah ee khaladka lagu qaato hogaanadda amaanhda (credit bureaus), sidaa awgeed, tani ma saameyso kiridhidkaaga.

Sharciga ayaa dhigaya in gobolku uu lacagta shaqada ka jaran karo haddii lagugu leeyahay lacagta dheeri ah oo khalad lagu siiyey oo labada nooc ee lacagta dheeri ah, laakiin tani waa arrin hadda uusan sameyn gobolku.

Lacagta dheeriga ah ee been abuurka lagu bixiyey, gobolku waxa uu ka qaadi kartaa talaabooyin kale, sidda:

- qabsasho hanti ma guurto ah
- maxkamadeyn iyo dacwo
- ku darid ganaaxyo kale lacagta
- kala bixid lacag akoonka bangigaaga,




Arrintani waxa ay u eg tahay wax cabsi badan leh, laakiin, mar labaad, gobolku ma sameynayo waxyaabahaa hadda.

Waxa aad heli doontaa ogaysiisyo ku saabsan lacagta dheeriga ah ee khaladka lagugu siiyey bil walba. Fur warqadahaa, hubina inay yihiin ogaysiiska caadiga uun aysana ku qornayn wax akhbaar ah oo cusub, ka dibna iska tuur.

## Maxaan kale oo aan sameeyaa?

Hubi inaad bixiso akhbaarta ciwaankaaga cusub haddii aad guurto **4-sanno** ee xigta ka dib kolka aad joojiso helida lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo. Ka samee arrintan akoonkaaga khadka (online) ka ama adigoo wacaya 651-296-3644. Haddii wax laga bedelo akoonkaaga ama lacag dheeri ah oo aad qaadatay ay soo baxdo, adiga ayaa ka mas'uul ah inaad ka soo jawaabto emaylka loo diro ciwaanka ku jira akoonkaaga.



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**